

Caawimo Ma Uga Baahan Tahay Bixinta Biilashaada?



Waxa aanu siinaa qorsheyaal kharash bixin, kharash celin, iyo qiime dhimis 12.5% ah macaamiisha u qalma

Turjumaad taleefanka ah ayaa la heli karaa

Waa maxay sababta biilkaygu uu aad ugu sarreeyaa?

BED waxa ay kaa caawin kartaa inaad fahanto agabka (nidaamyada kululeynta, kuleyliyayaasha biyaha iwm.) ama qalabka (shooladaha, qallajiyayaasha, uumi biyood saareyaasha) ee saameynta ugu weyn ku leh biilkaaga billaha ah. Wakiiladayada Adeegga Macmiilka ayaa marka hore ku siin kara la-talin. Shaqaalahayaga Adeegyada Tamartu waxa ay awood u yeelan karaan inay ku caawiyaan oo ay kugu la kulmaan goobta.

Maxaan sameyn karaa si aan u yareeyo biilashayda?

Ogaanshaha kuwa ay yihiin agabka iyo qalabka saameynta ugu weyn leh ayaa ah tallaabada koowaad. Casriyeynta agabka iyo qalabku waa qaali waxana ay qaadan kartaa wakhti dheer. BED waxay kula wadaagi kartaa xeelado kharash la'aan ah/kharash hooseeya oo kaa caawin kara inaad yarayso biilashaada. Si xeeladahani u shaqeeyaan, dhammaan xubnaha qoysku waa inay heshiis ku yihiin.

Waxa aan kiraysanayaa guri dabaq ah. Gurigayga ma la cimileyn karaa?

Haa! Balse taas lama sameyn karo iyada oo aan la haysan ogolaanshaha mulkiilaha guriga. BED waxa ay kuusoo diri kartaa macluumaad ku saabsan barnaamijyada oo ay tahay inaad u gudbisno mulkiilaha dhismaha, ama waxa ay la xidhiidhi kartaa mulkiilaha guriga iyada oo kaa wakiil ah adiga.

burlingtonelectric.com

802-865-7300

